

Dhexdhexaadiye dhaqan Haifaa ee SGGG

Dhibane kasta oo rabshado galmo iyo jinsi la xidhiidha (SGGG) ayey ku adag tahay inuu ka hadlo waayo-aragnimadiisa. Badbaadayaasha dhacdooyinka uur-ku-taalada leh ayaa badanka u arka inay isku koobaan xanuunkooda iyagu, inkastoo rabshadu aanay waligood qaladkooda ahayn. Joogitaanka dal cusub, ka fogaanshaha qoyska iyo asxaabta, aad ayey xataa ugasii adag tahay in la helo caawimo kuhaboon. Waxay caawin kartaa marka qof siiyo waxoogaa talo ah.



Dhexdhexaadiye dhaqan Haifaa

Dhexdhexaadiyaasha dhaqanka ee mashruuca [SAMEN](#) ayaa ku wada hadla luuqad isku mid ah, waxay sidoo kale leeyihii taariikh muhaajirnimo, waxaanay leeyihii khibrad qeypta daryeelka caafimaadka ah. Sidaasi darteed, waxay sidoo kale awoodaan inay ka caawiyaan badbaadayaasha SGGG dariiqooda mustaqbal fiican. Waxay xaliyaan caqabada u dhaxaysa soo galaytiga cusub iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee Netherlands.

Haifaa waa mid kamida dhexdhexaadiyaasha dhaqanka dadka carabiga ku hadla ee mashruuca SAMEN. Mashruucani waa wada-shaqeyn ka dhaxaysa Haayada Socdaalka Adduunka iyo Doctors of the World. Haifaa waa dhakhatarad iyo waxaanay khabuur ku tahay siyaasada iyo maareynta daryeelka caafimaadka. Waxay sidoo kale leedahay waxkabaden labo iyo tobant sano oo khibrad kaalmada bina'aadanimada ah. Haifaa waxay sharxaysaa: "Iyadoo sababtu tahay ku luglahaanshahayga haayadaha caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee Yemen iyo Netherlands, waxaan garanayaan caqabada dadka kujira xaaladaha nugul waajahayaan. Khibradahani dartood, waxaan ahayn xulufo la isku halayn karo, laakiin sidoo kale qof lala xidhiidhi karo".

Haifaa waxay ka tagtay dalkeedii ay u dhalaay, Yemen, si ay u timaado Netherlands. Sababtaasi darteed waxay garanaysaa waxa caqabada jidheed iyo maskaxeed ee dadka baxsadka ah yihiin. Waxay sharxaysaa: "Iyadoo sababtu tahay taariikhda la wadaago ee fahamka socdaalka iyo dhaqamada kala duwan, soo galaytiga cusub waxay u sahlanaata inay la xidhiidhaan dhexdhexaadiyaasha dhaqanka

sidayda oo kale. aragtayada darteed waxaan awoodnaa inaan caawino dadka: waxaan fahanaa caqabada, waxa naga go'an inaan caawino, u dhageysano si taxadir leh khibradaha oo qaabkani waxaan awoodnaa inaan dhisno kalsooni". Iyadoo tusaale bixinaysa, Haifaa waxay sharxaysaa waxa faa'idada dheeraadka ah u yahay aragtideeda. "Waxaan xasustaa gabadh kasoo qaxday Afrika oo timid Yemen. Waxay waajahday uur-ku-taalo weyn, oo ay kujirto rabshad galmo iyo uur lama filaan ah. Kooxdayaada ayaa siisay caawimada ay u baahnayd wakhtigaasi: daryeel cilmi-nafsi, daryeel caafimaad iyo caawimo sharci. Tani waxay kaliya muujinaysaa in shaqadayadu muhiim tahay. Waxaan halkaa u joognaa dadka kujira xaalado adag".

Waxa Haifaa ka hadlayso waxa ku jira xataa dhibaato ka weyn oo rabshadaha ka dhanka ah dadka ka qaxaya khilaafka iyo dagaal. Cilmi-baadhis 2015 ah ayaa muujinaysaa in 61-80% qaxoontiga dumarka ah iyo 25-56% qaxoontiga raga waa jeheen rabshad galmo. Iyadoo sababtu tahay ceebaynta mawduucani, xaqiqiqtan, tirooyinku inay kasii badnaadaan tani ayey u badan tahay.

Inkastoo tirooyinkan naxdinta leh jiraan, shakhsiyadka muhiimka ah ayaa u saamaxa rajo iyo xidhiidh. Haifaa waxay bixinaysaa tusaale dhiirigalin leh: "Gabadh ayaa noo sheegtay inay u noqotay dhibane ka ganacsiga binaadamka iyo rabshadaha galmo. Anagoo kaashanayna haayada shuraakada ah waxaanu siinay caawimada ay u baahnayd si ay usoo kabato." Marka lagayimaad caawimada gaarka ah, Haifaa waxay sidoo kale macluumaad ka bixinaysaa caafimaadka galmada. "Wada-hadaladani waxay isku keenaan dadka kasoo jeeda meelo kala duwan. Wuxaan u sameynaa deegaan badqaba qofkasta oo kujira kaasoo uu ugu sheegi karo khibradiisa dadka kale", Haifaa ayaa sharxaysa. Iyadoo fiirinaysa sawirka weyn, Haifaa waxay kusoo gabogabaynaysaa: "Bilihi u danbeeyey kooxda SAMEN waxay fulisay hawlo tilmaamaya waxa awooda wada-shaqeynta iyo naxariistu tahay. Wadajir waxaynu u sameyn karnaa khibrado qurux badan bulshooyinkeena dhexdooda."



Dhexdhexaadiyayaasha dhaqanka intii lagu jiray xarunta caafimaadka ee Doctors of the World.



Co-funded by
the European Union